

Hoos u dhigida lacag bixinta ee booska xanaanada caruurta:

Hoos u dhigidda lacagta waalidku bixiyo.

Qoysaska leh dakhliga guud ee ka hooseeya heerka dowladda * wuxuu bixin doonaa ugu badnaan lix boqolkiiba dadka ay canshuurtu waajibka ku tahay bixiya ama kuwa dakhli raasamaal ah leh.

Wakhtiga lacag la`aanta ah ee xanaanada caruurta.

Wakhtiga lacag la'aanta ah waxaa loola jeedaa in 20 saacadood oo joogista xannaanadu ay tahay bilaash. Tan waxaa lagu nidaamiyay marka loo eego dakhliga qoyska. Heerka Dawladda * waxay khusaysaa ilmaha jira 3.4 iyo 5 sano iyo caruurta kale ee dib looga dhigay iskuulka..

Aasaaska xisaabinta.

Lacagta waalidku bixiyo ee xanaanada caruurta waa in lagu xisaabiyaa iyadoo lagu saleynayo canshuur bixiyaha hantida qoyska iyo dakhliga shakhsi ahaaneed. Tan waxay ku saabsan tahay labadaba nidaamka hoos u dhigista lacagta waalidka iyo qorshaha guud ee wakhtiga lacag la`aanta.

Qoyska waxaa laga wadaa, lamaanaha isqaba, lamaanayaasha wada nool ee diiwaangashan. Sida wada noolaanshaha, waxaa loola jeedaa laba qof oo aan is guursan oo da'doodu ka weyn tahay 18 jir oo wada/isla nool, oo ku wada noolaa xiriirka guurka-mid u dhigma ugu yaraan 12 bilood oo ka mid ah 18kii bilood ee la soo dhaafay, ama carruur isuleh. Haddii ilmuhu la nool yahay labada waalidba, lacagta waalidka bixiyo waa in lagu xisaabiyaa iyadoo ku saleysan dakhliga qoyska meesha uu ilmuhu kaga jiro diiwaanka dadweynaha.

Goorma ayay tahay in aad codsato dhimista?

Waxaa fiican inaad codsatid dhimista lacagta waalidku bixiyo marka aad ogolaato booska xanaanada caruurta.. Waa suurtagal in la dalbado labada qaab ee kor ku xusan.

Xilliga kama dambaysta dalbashadu waa 1 Juun.

Waxaad ka codsan kartaa foomamka elektarooniga ah ee bogga degmada ku jira. Foomka waxaa loo isticmaalaa labadaba xanaanada caruurta ee dagmada iyo kuwa aan ahayn degmada. Waa suurtagal in la waydiin karo caawimaad ku saabsan qaabka codsi meesha aad xannaanadda caruurta ee aad booska ka heshay. Xeerka guud ee xanaanada caruurta waxa uu ku saabsan yahay in codsigu khuseeyo sanad walba.

Shuruudaha

Si aad u hesho qiimo dhimis waa in uu dakhligaagu hooseeyo waa inaad.

- Soo gudbiso codsi lacag dhimista waalidka laga dhimayo iyo wakhtiga bilaashka ah. Isticmaal foomamka elegtarooniga. Foomka waxaa loo isticmaalaa labadaba xanaanada caruurta ee dagmadu leedahay iyo kuwa aanay degmadu lahayn Waxaa ka shaqaynaya codsiga degaanka ilmuhu ka diwaan gashanyahay.

- Soo dir/gudbi nuqul/koobi ah canshuur celintii ugu dambeysay ama dukumentiyada kale ee dakhligaaga. Dukumentiyada kale ee dakhliga waxay noqon karaa mid khuseeya haddii dakhliga qoysku uu yahay mid isbedel ah iyo isbedel joogto ah. Tan waxaa laga wadaa khasaare dakhli oo weyn sababtoo ah shaqa la'aanta muddada dheer ah, isbeddelka ka yimaada guriga ama wax la mid ah. Xaaladahan oo kale, waxaa laga yaabaa in la codsado adigoo soo gudbinaya dukumentiyada kale oo dakhliga ah.

Dhamaan warqadaha dakhliga waa in la helaa ka hor intaan kiisku bilaabmin.

* Qaabka dawladdu wax u xisaabiso waa uu is bedeli karaa isaga oo raacaya miisaaniyadda la samayay. Ka fiiri/eeg boggaga internetka ee degmada iyada oo la dhimayo/yareynayo lacagta waalidku bixiyo ama waqtiga bilaashka ah.

Xilliga ugu dambeeya ee la codsan karaa waa 1. Juun. Bilawga sanadka, ayaa codsi si joogto ah loo diri doonaa.

[Hoos u dhigidda lacagta waalidku bixiyo](#)

Waxaad ka heli doontaa dhammaan foomamka la keydiyay iyo wixii la soo gudbiyayba [qaybta boggaaga](#)

Qiimo dhimid walaalaha.

Hadii aad leedahay carruur badan oo (walaalo ah) oo taga/aada xanaanada caruurta oo ku nool cinwaan isku mid ah (walaalaha ayaa lagu qeexay dibedda, cf. xeerka ku saabsan bixinta lacagta waalidnimada) ma bixi saa:

- Kadib waxaad bixinaysaa 70% ee qiimaha ilmaha labaad
- 50% ayaa bixinaysaa qiimaha ilmaha saddexaad (ama carruur intaa ka badan).